



Documenting and sharing everyday expressions of tradition, innovation, and culture.

Wax ka baro Barnaamijka Tababarka Farshaxanka Dhaqanka ee Vermontogram

Vermont Folklife waa urur aan dawli ahayn. Wuxaan taageernaa dhammaan bulshooyinka Vermont (cusub iyo kuwii hore) inay sii wadaan oo ay wadaagaan dhaqamadooda.

Wuxaan xiisaynaynaa inaan kugu taageerno sii wadida wax kasta oo aad samaynayo ee kugu xidhaya caadooyinkaaga dhaqanka, qoob ka ciyaarka, tolnimada, daabacaadda, alwaax-qorista, dhoobada, sawir-qaadista, samaynta iyo ciyaarista qalabka muusiga. Kuwani waa inay noqdaan waxyaabo aad ka baratay qoyskaaga, deriskaaga, ama bulshadaada oo muujinaya nooc ka mid ah aqoonsiga la wadaago.

Wuxaan rabnaa in aan kaa caawino fulinta caadooyinka adiga kugu habboon. Wuxaan rajaynaynaa in marka aad nolosha la dagto halkan Vermont aad hesho habab ay caadooyinkaagu u koraan oo ugu koraan halkan Vermont.

Marka lagu daro taageerada laga yaabo inaad ka hesho guriyeynta, daryeelka caafimaadka, waxbarashada, iwm, waxaan rabnaa inaan ku siinno taageero ku saabsan waxyaabaha aad sameyso ee muujinaya (ama kugu xiraya) aqoonsigaaga dhaqameed. Aan kaa caawinno inaad caadooyinkaaga u gudbiso jiilalka yaryar.

Wuxaan taageereynay fanka dhaqanka ee Vermont muddo 30 sano ah waxaanan baranay in u gudbinta caadooyinka jiilka soo socda ay ka caawiso kahortaga dareenka gooni-isu-taagga ama luminta dhaqameed marka la samaynayo nolol meel cusub.

Wuxaan bixin karnaa:

- Taageerada dhaqaale
- Taageerada helitaanka agabka
- Taageerada boos helida
- La xidhidhiyaha dadka kale ee ku jira VT samaynaya waxyaabo kula mid ah
- Fursad aad ku biirto bulshada ilaalinaya fanka dhaqanka

Wax badan baro: <https://www.vtfolklife.org/apprenticeship-program>

Si aad wax badan u barato wac ama iimayl u dir Agaasimaha Kate Haughey: 406-672-2729
khaughey@vtfolklife.org

Tusaaloyinka Mashruuca



Tashi shoepa - Tibetan muusiga iyo cayaaraha




Farshaxanka Burmase



Daabacada dharka iyo kuulasha Somali Bantuga



Farshaxanka Abenaki



Tolida Danbiilaha



New England Ciyaaraha iyo Musiga